

Dhawaaqyada af soomaaliga



Adobe Stock / kubko

Afka ay dadku ku hadlaan waxa uu ka yimaadaa dhowaaqyo la isku geeyey. Dhawaaqyadaasi marka isku xidhxidho waxay sameeyaan eryo qaab iyo micno gaar ah oo aan fahamno. Isku xidhxidhkaasi waxa uu raaca xeerar gaar ah oo afku iska leeyahay, naxwe.

Marka la doonayo in la qoro afka waxa la adeegsadaa xarfo ama calaamado u taagan dhawaaqyada kale duwan ee afku leeyahay. Dhawaaqyada uu afka soomaaligu adeegsadaa waa kuwan ku tusan jaantuska hoose tiradooduna waxa ay dhan tahay 32 sumadood. Waxa y u kala baxaan shibaneyaal iyo shaqallo. Waxa jira dhowaaqyo ay u taagan yihiin hal xaraf sida b, t iyo s iyo kuwo ay u taagen yihiin laba xaraf sida sh.

Shibbaneyaal	Shaqallo
Bb	Aa
T t	Ee
J j	Ii
X x	Oo
KH kh	Uu
Dd	
Rr	AA aa
Ss	EE ee
SH sh	II ii
DH dh	OO oo
C c	UU uu
G g	
F f	
Q q	
K k	
L l	
M m	
N n	
W w	
H h	
Y y	
' (hamse)	

Afka soomaaligu waxa uu isticmaala tiro goa'an oo dhawaaqyo ah oo sameeya erayo kale duwan marka la isugu daaro si gaar ah. Dhawaaqyo kasta isku darkoodu ma curiyo erayo macno sameynaya oo ka mid afka tusaale ahaan haddii aan isku darno **a + c + b** waxay ina siinaysaa **acb** oo aan lahayn macno haddiise ayu isku xidhno sidan **c + a + b** waxay sameeyaan **cab** oo ah eray macno leh . Haddii mid ka mid ah la beddello xufuufaa waxa dhicikarta in eray cusub oo macno lehi ka samaysmo, mase aha shuruud. Tusaale haddii aan ku beddelno xarafka s xarafku ugu dambeeya **cab** waxa k dhaalanaya erayga **cas** kaasi oo ka mid ah erayada afka soomaaliga.

Imtixaan kooban oo xuruufta ,feejignaanta dhawaaqa , akhris erayo iyo adeegsiga

erayada ku saabsan.

1. Ma taqaanaa xarafyadaa magacaaga ku jira?
2. Sheeg xarafyadan (magacooda iyo dhawaaqoodaba)

m s r a h y q f k c aa b kh /12

1. Dhawaaqee ugu horreya ereyadan:: Guri, Kab Mas, Hees, Caano
? /5
2. Dhawaaqee ugu dambeeya eryadan: Beer, Kursi, Dariishad, af,
Qor? /5
3. Maxaa soo hadhaya haddii laga tago "M" ee ku jira mas, "D" ee ku jira
dab? /2
4. Eraygee kuu soo baxaya markaad isku darto xarafyadan f, u, r? q, o, r, i, d?

u, b, a, x, y, o ? /3

1. Eraygee

la dhawaaq beer Gar? Xan? /3

2. Akhri erayadan:

Af	San	Guri	Cirbad	
Il	Lax	Orod	Maroodi	
Ey	Qor	Akhri	Farbarad	/12

1. Meeqa/immisa cunto oo kale duwan ayaad magacooda ku sheegi kartaa hal daqiiqo?

Tiro Xidhiidh?

Meeq/immisa xayawaan ayaa magacooda ku sheegi kartaa hal daqiiqo?

Tiro Xidhiidh?

Qiimeyn: